# Xidhmada Macluumaadka ee Dugsiga Fasalka 7-aad

# Sibtembar 2022

Fadlan si taxadir leh macluumaadka ku qoran buug-yarahan u akhri oo meela dhigo si aad mustaqbalka ugu tixraacdo


**HORDHAC**

**3 Soo dhawoow**

**DHAQANKA IYO ANSHAXA**

**5 Macluumaad Muhiim ah**

**FILAASHOOYINKA**

**10 Waxyaala ardeydayada laga filanaayo**

**12 Direyska- Gabdhaha**

**13 Direyska- Wiilasha**

**IS DIYAARINTA**

**15 Is diyaarintu waa muhiim**

**20 Muusiga**

**22 Farshaxanka iyo Naqshadeynta**

**23 Oggolaanshaha Biometric-ga**

**24 Xeerarka Ammaanka Internetka iyo Heshiiska Isticmaalaha ee La Aqbali karo**

**26 Liisada Qalabka, Sanduuqyada iyo Buugaagta**

**MACLUUMAAD DHEERAAD AH**

**29 Ururka Macalimiinta iyo Waalidiinta**

**30 Xeerarka Dugsiga**

**31 Deeqaha Dugsiga la Siinaayo**

**32 Nidaamka Cabashooyinka loo sameeyo**


**SOO DHAWOW**

**MAAMULAHA Ms L Mills**

**MAAMULE KU XIGEENKA SARE Mr C Killen**

**MAAMULE KU XIGEENKA Mr C Killen**

**HOGAANKA ILAALADA LOO QORSHEEYEY Mrs C Guitane**

## SOO DHAWOW

Waxa aanu aad ugu faraxsanahay inaad doorataay inaad nagu fasalka 7 bisha Sibtembar nagu soo biirto. Waxa aanu rajeyneynaa inaan ku soo dhaweyno.

Waxa anaga Drayton Manor, ujeedkayagu yahay inaan bixino waxbarasho hammi sare leh oo aanay waxba hor istaageynin raadinta tacliin heer sare ah iyadoo sidoo kale qani ku ah habdhaqanka iyo horumarka shaqsi ahaaneed labadaba. Waxa ay mabaadi'daasi noo suurtogaliyaan inaanu soo saarno ardey horumar shaqsi ahaaneed iyo aqoon sare leh kuwaas oo ku dadaala inay noqdaan muwaadiniin ku dayasho mudan.

Waxa bayaanka hadafka dugsigayaga iyo manhajka gundhig u ah waxyaalaha aanu qiimeyno ee asaasiga ah ee sida Hamiga, Habdhqanka iyo Hanaanka Wanaagga ee Muwaadiniinta. Waxa aanu aaminsanahay in waxyaalahaas aanu qiimeynaynaa ay udub dhexaad u yihiin ku guuleysiga dugsigan cajiibka ah oo aanay muhiim u noqon doonaan guusha nolosha, marka lagu daro dhammaan xirfadaha iyo shahaadooyinka ay ardaydayadu heli doonaan xilliga ay anaga nala joogaan.

Laga soo bilaabo loolanka iyo dhiirigelinta fasalka dhexdiisa oo waxyaabo badan oo waxqabadyo manhajka ka baxsan ah, ayaa waxa jirta fursad badan oo ay ardayda Drayton Manor heli karaan. Waxa uu anaga doorkayagu yahay in aanu ardayda ka caawino sidii loogu hagi lahaa fursadaaas la kala dooranaayo, si ay inta ugu badan uga faa'iidaystaan maalin kasta, iyo inay go'aansadaan inay noqdaan sida ugu wanaagsan ee ay igu yihiin inta ay ku dhex jiraan safarka.

Waxa aanu rajeyneynaa inaanu bisha Sibtembar dugsigayaga kugu soo dhaweyno.

Ms L Mills
Maamulaha

Dhaqanka iyo anshaxa

MACLUUMAADKA MUHIIMKA AH OO ARDAYDA IYO WAALIDKA LOOGU TALOGALAY

## HILIMOOYINKAYAGA

Waxa uu Dugsiga Sare ee Drayton Manor raadinayaa inuu dhamaan ardeyda siiyo waxbarashada heerka ugu sarreysa ee suurtogalka ah leh oo  korna loogu qaado horumarka ugu sarreeya ee suurtogalka ah ee kartida iyo awooda gaar ahaaneed ee ardayda oo ku dhex jira bulsho dulqaad iyo daryeel leh.

Waxa uu hadafka dugsiga ee ardaydiisu yahay:

- Waxbarasho ku salaysan filashooyinka ugu sarreeya
- Goob shaqo oo dhiirigelin leh, ammaan ah oo edaab wanaagsan leh
- Waxbarasho ballaadhan, isku dheelitiran oo ku habboon
- Heerka ugu sarreeya wax loogu dhigo, la siiyo taageero shakhsi ahaaneed iyo hagitaan
- Layliga si joogto ah guri lagu soo sameeyo kaas oo sanad dugsiyeed kastaa uu jedwal la daabacay leeyahay
- Layliga oo si joogto ah loogu calaamadeeyo
- Taageerada iyo hirgelinta Siyaasadda u sinaanta Fursadaha ee Dugsiga Sare ee Drayton Manor
- Si joogto ah loogu helo jawaab celin iyo warbixinta ku saabsan horumarka kuwaas oo ay ku jiraan warbixin qoraal ah iyo kulanka waalidiinta oo sannadkii hal mar ah
- Khibrado kala duwan oo waxbarasho taas oo ay ku jiraan isticmaalka maktabadda iyo adeegyada ICT-ga
- Fursadaha lagu sameynaayo waxqabadyo dheeri ah oo kala duwan

Waxaanu sidoo kale u aragnaa inuu iskaashiga ka dhaxaysa dugsiga, waalidiinta iyo ardayda udub dhexaad anshaha dugsiga u yahay. Waxaanu iskaashigaas u aragnaa inuu yahay heshiis ka dhexeeya waalidiinta, ardayda iyo dugsiga. Waxaanu dareemeynaa inay muhiim u tahay hubinta inay ardaydu ay si niyad ah dadaalkooda ugu galiyaan shaqada adag ee hubin doonta inay Drayton Manor ku guulaystaan.

## NIDAAMKA GURIGA

Waxa uu nidaamkayaga gurigu dhaqanka iyo anshaxa Drayton Manor ka ciyaaraa doonaa door muhiim ah. Waxa ay abuurtaa fursado ka qeybgalka waxqabadyada manhajka ka baxsan, la shaqaynta hay'adaha samafalka iyo bixinta fursadaha hoggaaminta ee dhamaan ardayda da' kasta leh. Waxa ay sidoo kale awood noo siisaa inaanu ardeyda barno waxyaalaha la qiimeeyo ee sida Hamiga, Habdhqanka iyo Hanaanka Wanaagga ee Muwaadiniinta

Barnaamij cusub oo dhacdooyin iyo waxqabadyo ah ayaa la daabacaa teeramka kala badhkiis kaas oo isugu jira tartamo isboorti, doodo, wax dubitaanO, farshaxan iyo waxyaalo kale oo badan. Waxa uu Nidaamka Gurigu sidoo kale isku xidhaa jedwalka dugsiga isagoo bixiya waxqabadyo la xidhiidha toddobaadyo gaar ah, sida ‘resilience week’.

Waxa uu guri kastaa leeyahay koox Kabtanka Guriga kuwaas oo ka kooban arday muujiya waxyaalaha uu qiimenaayo dugsigu wax kasta oo ay sameeyaan. Waxa ay ardaydaaasi mas'uul ka yihiin kor u qaadista Nidaamka Guriga waxayna qaabeeyaan oo ay abaabulaan munaasabadaha dugsiga oo dhan. Kabtannada Guriga waxay go'aamiyaan hay'ad samafalka maxalli ah ee uu Gurigu taageeri doono iyadoo ujeedku yahay in ardaydu 'bartaaan' samafalka oo ay saameyn macno lehna ku yeeshaan lacag ururinta iyo wacyigelinta.

Waxa dhammaadka teeram kasta la arkaa dugsiga oo dabaal degaaya iyadoo ah dhowr arrimood go'aamin doonaan cida la siinaayo abaalmarinta Koobka guriga. Waxa kuwaas ka mid ah natiijooyinka tartamada, Imaanshaha guriga, iyo diiwaanka abaalmarinta ee ardayda.

## GOLAYAASHA DUGSIGA IYO SANADKA

Waxa uu dugsi kastaa leeyahay Golaha Sanadka kaas oo ka kooban wakiillo ka socda koox kasta oo macallin ah iyo Golaha Dugsiga ee aadka u firfircoon. Waxay ku lug leeyihiin siyaasadda iyo go'aan qaadashada dugsiga dhexdiisa lagu sameynaayo. Waxay tusaale ahaan gacan ka geysteen samaynta qoraalka ardayga ee Heshiiskayaga Dugsiga iyo Gurigayaga, qorshayaadha ka hortagga xoog sheegashada, Axdiga Ardayga iyo horumarinta dhismaha.

## SAFIIRADA CAAFIMAADKA WANAAGSAN

Safiirada caafimaadka wanaagsan waa wakiilada ardayda oo leh mas'uuliyadda hogaaminta iyo kor u qaadista caafimaadka dadweynaha jooga dugsiga. Safiirada caafimaadka wanaagsan waxay qeyb ka yihiin koox balaadhan oo ah arday la soo doortay ah, kuwaa oo mid walbana leeyahay wax uu si gaar ah diiradda u saarayo, tusaale ahaan ka hortagga xoog-sheegashada, caafimaadka dhimirka, ammaanka internetka ama dabeecada/deegaanka. Si wada jir ahaaneed, shaqada dugsiga oo dhan iyagoo ah taageereyaal asaaga ah iyo ololayaal samafal oo socodsiiya dhacdooyinka sannad dugsiyeedka oo dhan - safiirrada caafimaadka wanaagsan ayaa udub dhexaad u ah caafimaadka dugsigeenna.

## AXDIGA ARDEYGA - WAXYAALAHA AANU QIIMEYNO AYAA ILAALIYA AMMAANKA IYO CAAFIMAAD QABKA

Hyad arday ahaaneed, ayay noo cadahay in aananu aqbali dooni dhaqamada si ula kac ah u dhaawacaya ama ka cadhaysiinaya xubin ka mid ah bulshadayada ha ahaato jidh ahaan, hadal ahaan ama maskax ahaanba.

Waxa dabeecadahaan ka mid noqon kara:

1. Faafin xanta ama hadalada xanta ee waxyeelada leh
2. Si ula kac ah u keenaya walaac iyadoo la iska indhatiraayo dadka kale ama reebaaya kooxaha asxaabta
3. Xubin laga yahay koox cabsi gelin leh
4. Habdhaqanka hanjabaada, gardarada ah ama cabsi gelinta ah, taas oo ay ku jirto in dadka kale lagu kiciyo inay handadaan ama cabsi gelin sameeyaan
5. Abuuritaanka xaalad aan ammaan ahayn
6. Dadka magac loogu yeedho taas oo ay ku jirto in qof muuqaalkiisa jidh ahaaneed wax laga sheego
7. In dadka kale lagu jeesjeeso oo la isticmaalo 'kaftan' si sabab looga dhigo in laga yaso/quudhsado ama laga maadsado ama loo gudbiso faallooyin gef ah
8. Rabshado gacan ka hadal ah oo loo geysto xubin ka mid ah bulshadeena
9. In lala falgalo ururo ama kooxo iyagu shiirigaliya aragtiyo xad jir ah, nacayb ama rabshado
10. Habdhaqanada cunsuriyadda ah ee dhibaaya ee meel kaga dhacaaya asalka qowmiyad, diin ahaaneed, asal ahaan meesha juquraafi laga soo jeedo ama midabka maqaarka
11. Habdhaqanka xagga galmada khuseeya ee hoos u dhigaaya, cabsi gelinaaya ama waxyeellada leh
12. Khaniis nacaybka, Biphobic iyo dhaqanka Trans naceybka oo muujinaya dulqaad la'aanta dadka kale aqoonsiga jinsigooda ama jihada galmadooda
13. Isticmaalka aaladaha dhijitaalka ah si ay ugu diraan, ku soo qoraan, ama ay la wadaagaan, waxyaalo, xun, been ah, ama macluumaadka aan habboonayn oo internetka lagu soo qoro taas oo ku saabsan xubin ka mid ah bulshadeena
14. In la soo galo boos qof u gaar ah ama xiriir jidh ahaaneed oo aan la rabin
15. Aargoosi ama aargoosi ka dhan ah arday dhacdo soo sheegay

Haddi aanu aragno ama la kulano dhaqamo noocaas ah, waxa aanu:

- U sheegi doonaa qof weyn ama aanu weydiin doonaa inuu saaxiib anaga noo sheego. Waxa uu qofka weyni noqon karaa qof kasta oo dugsiga ka shaqeeya, ama waalid ama labadaba

• Waxa aanu sidoo kale u sheegi karnaa wakiila caafimaadqabka kaas oo sawirka kooxda Hoggaanka Ardayga ama calaamadooda jaalaha ah lagu aqoonsan doono

## GOOBTA

Waxa uu ku yaal wadada Drayton Bridge Road, iyadoo sidaas darteed si fudud dhammaan xaafadaha degmada looga imaan karo. Khadka baska ee E1 iyo E3 ayaa garab mara ama mara meel ku dhow dugsiga, sida ay sameeyaan adeegyada kale ee Greenford ama dhanka Waddada Uxbridge mara. Hanwell iyo Drayton Green (Stations) ayaa dugsiga u jira saddex daqiiqo oo keliya uun. Waxay arday badani go'aansada inay baaskiil u soo kaxeystaan ama lug ku yimaadaan. Waxa ardayda baaskiilka soo kaxaysta laga rabaa inay koofiyadda soo xidhaan.

## ILAALINTA DUGSIGA

Waxa uu dugsiga Sare ee Drayton Manor si buuxda u aqoonsanayaa mas'uuliyadihiisa uu ku ilaalinaayo ama uu kor ugu qaadaayo daryeelka dhammaan carruurta iyo dhalinyarta  iyo doorka ay ka ciyaaro nidaamka ilaalinta ee guud. Waxa uu dugsigu hubin doonaa inuu abuuro dhaqan foojignaan leh iyo dhamaan talaabooyinka lagama maarmaanka ah la qaado si carruurta iyo dhallinyarada looga illaaliyo waxyeellada si ilmo kasta iyo qof dhalinyar ah oo kasta oo dugsiga yimaada uu awoodo inuu ka qeybqaato bay'ad lagu raaxaysto oo ammaan ah oo lagana ilaaliyo inay waxyeelo soo gaadhto.

Haddii ay wax walaac ahi jiraan, la xidhiidh Hogaanka Ilaalinta ee Loo Qorsheeyey Mrs C Guitane oo leh telefoonka 0208 357 1900 lambarka gudbinta 1311

Filashooyinka

WAXYAALAHA LAGA FILANAAYO ARDAYDAYDA

## KA SOO XAADIRAADA

Waalidiinta iyo ardayda ayaa shaki la'aan fahmi doona inay imaanshaha wakhtiga buuxa iyo in wakhti lagu yimaado teeramka oo dhan ay lagama maarmaan tahay. Waa inay ardaydu keliya maqnaadaan uun haddii aanay awoodin inay dugsiga yimaadaan. Balamaha caafimaadka iyo dhakhtarka ilkaha waa in loo qabtaa wakhti ka baxsan saacadaha dugsiga maadaama oo fasaxa maqnaanshaha ee ujeedadan kaliya la isa siiyo uun waxyaalaha daaweynta ilkaha ee weyn ama gargaarka degdegga ah.
Saacadaha imaanshahu waa 8.55 subaxnimo - 3.30 galabnimo. Fasaxa qadadu ee ardayda fasalka 7 waxa uu noqon doonaa 12.30 - 1.30 galabnimo. Waxa si gaar ah loogu qabanqaabin doonaa maalinta koowaad ee teeramka si ardeyda looga caawiyo inay dugsiga ku soo biiraan. Ardayda fasalada 7 ilaa 11 ayaan loo ogolayn inay barxada dugsiga ka baxaan xilliyada biririfta/nususaacaha ama wakhtiga qadada.

## FASAXYADA

Sida waafaqsan tilmaamaha Hay'ada Waxbarashada ayaan waalidiinta loo ogolayn inay caruurtooda kala baxaan dugsiga si ay fasax ugu aadaan inta dugsiga lagu jiro. Waxka bedelis lagu sameeyey Shuruucda Waxbarashadu ayaan hadda ka dib u ogoleyn inuu Maamulahu fasax dugsiga lagagag maqnaanaayo siiyo haddii ay ujeedadu tahay fasax qoyska.

## WAXBARASHO DADKA OO DHAN LOOGU TALOGALAY

Waxa uu dugsigu ka soo horjeedaa fikradaha aan salka lahayn oo laga qabo iyo takoorida nooc kasta ha ahaatee. Waxa ka go'an in laga hortago takoorida markasta oo ay dhacdo waxaana la doonayaa in la sameeyo jawi waxbarasho oo lagu aqoonsanaayo faa'iidooyinka iyo fursadaha wanaagsan ee uu leeyahay wada noolaanshaha bulshada kala duwani.

## HAB DHAQANKA IYO FILAASHOOYINKA DUGSIGA DHEXDIISA

Akhlaaq heerka aad u sareeya ayaa lama huraan ah marka lagu sii socdo ama laga soo socdo dugsiga (gaar ahaan gaadiidka dadweynaha dhexdiisa) iyo sidoo kale marka la joogo goobta dugsiga. Waxa ardayda laga filanayaa inay u hoggaansamaan Xeerka Dugsiga ee Bulhada inteeda kale oo ay had iy ojeer ixtiraamu muujiyaan dadka kale, macalimiinta, shaqaalaha aan waxbaridda ku lug laheyn, ardayda iyo xubnaha dadweynaha. Waa inay ardaydu muujiyaan akhlaaq heer sare ah sida qeybta ka ah dadaalkooda ay ku muujinayaan habdhaqan wanaagsan. Waxa ardeyda laga filanayaa inay barxada ugu dhex socdaan si degan, degdeg ah oo ujeeddo leh. Waa inay casharrada, ardaydu xoog u shaqeeyaan oo ay marka ugu horeysaba raacaan dhammaan tilmaamaha shaqaalaha. Waxay ardeydu mas'uul ka yihiin heerkooda habdhaqanka iyado laguna abaalmarin doonaa hab dhaqanka wanaagsan.

Waxa agagaarka goobta dugsiga ay ardaydu ugu wada xidhiidhaan cod degan si ay u taageeraan bay'adeena ujeedada leh. Waxa sidoo kale laga rabaa inay direyska si fiican u xidhaan iyadoo uu taygu dheeryahay oo wakhti kastana shaadhka hoosta la galiyo marka dugsiga lagu jiro iyo marka lagu dhex safraayo bulsho weynta dhexdeeda.

## DHAMAADKA MAALINTA DUGSIGA

In la is dhexgalo dadka qalaad ee kasta (marka laga reebo waalidka) ayaa mamnuuc ah. Waxa uu xeerkani u jiraa si kor loogu qaado daryeelka ardayda. Si loogu hubiyo in si hufan loogu dhaqangelin karo, waa in sidoo kale lagu dabaqaa xubnaha qoyska ardayga haddii aan dugsiga hore looga wargalin wixii wax qabanqaabin gaar ah ee loo baahan yahay. Waxa ay sidoo kale tahay muhiim in wax kastaa ha dhacaane aanay ardaydayadu booqdan karin dugsi kale marnaba haddii aan taas hore loo sii ogolaan. Waxaan ciqaabi doonaa ardey kasta oo ardeydayada ka mid ah oo jebiya sharcigan. Waa inay ardaydu si toos ah guriga ugu safraan iyagoo aan goobta ku sugin. Ardaydu midna ma booqan doonaan dukaamada dugsiga u dhow. Waxa ay bosteejada baska ardaydu galayaan saf iyagoo u oggolaanaya inay dadweynahu marka hore baska fuulaan.

## SHINE

Waxa aanu dugsiga Drayton Manor rabnaa in dhamaan ardaydu noqdaan shaqsiyaad horumar dhiac kasta ah leh kuwaas oo markay soo baxaan cid cad oo waxtar leh bulshada wax ugu soo kordhin doona. In la ahaado Draytonian ayaan kaliya aheyn in tacliinta lagu guuleysto, ee waxa weeye in la muujiyo waxaalaha asaasiga ah ee uu dugsigu qiimeynaayo ee Hamiga, Habdhqanka iyo Hanaanka Wanaagga ee Muwaadiniinta ee dhammaan qeybaha kala duwan ee nolosha ardayga. Waxa Shine ka mid ah waxyaalo ka baxsan manhajka rasmiga ah oo ay ku jiraan tayeynta, hogaaminta ardayda, barnaamijkayaga qani ah ee kala duwan iyo barnaamijka macalinka iyo qeyb muhiim ah oo ka tirsan horumarka shaqsiga sida Xidhiidhada iyo Waxbarashada Galmada, Bulshada, Akhlaaqda, Horumarka Bulshada iyo Dhaqanka iyo Caafimaadka Bulshada iyo Waxbarashada shaqsi ahaaneed.

Ardayda joogta Drayton Manor waxay sidoo kale leeyihiin wakhti manhaj ah oo u go'an SHINE halkaas oo ardayda fasalka 7 ay diiradda saari doonaan:

- Sameysashada xiriiro wanaagsan iyo xallinta khilaafaadka
- Caafimaadka iyo daryeelka
- Ammaanka internetka iyo in tignoolajiyada loo isticmaalo si wax tar leh
- In la fahmo isbeddelka ay dhallinyaradu ku jiraan - jidh iyo shucuur ahaanba.

Xilliga la qaadanaayo casharada SHINE, ayay ardaydu sidoo kale sanadka oo dhan heli doonaan fursad ay kaga qeybqaadanayaan in la wada heeso halkaas oo koox fasal kastaa ay baran doonto oo ay qaadi doonto heeso u dabaaldegaya oo ka tarjumaya kala duwanaanta ardeydayada.

## XEERARKA HUBKA

Arday kasta oo lagu qabto isagoo haysta hub wax lagu weeraro ayaa naftiisa geliyaa halis lagaga joojiyo dugsiga waxa uuna heli doontaa ugu yaraan in muddo xadidan laga saaro. Haddii Maamuluhi ku qanacsan yahay in ay suurtogal tahay in arday uu hubka wax lagu weeyero dugsiga u soo qaatey iyadoo ujeedaduna tahay in la hadido ama la waxyeeleeyo qof kale ayaa si joogto ah dugsiga laga caydhin doonaa. Nuqul ka mid ah Xeerkan ayaa bogga internetdka ee dugsiga laga heli karaa.

## WALXAHA MAMNUUCA AH OO AY KU JIRAAN MAANDOORIAYAASHU

Waxaan jeclaan lahayn inaan hadana qaadano fursadda aanu mar kale ku cadeynayno in arday kasta oo maandooriye keena dugsiga ay naftooda galinayaan khatarta dugsiga si joogto ah loogaga caydhinaayo. Nuqul ka mid ah xeerarka dugsiga oo ay ku dhigan yihiin walxaha la mamnuucay oo uu maandooriyahu ku jiro ayaa laga heli karaa bogga internedka.

## AMAANKA INTERNETKA

Waxaad wax ka ogaan doontaa walaaca khuseeya si ammaan ahaan u isticmaalka internetka. Iyadoo casharo iyo kulanno la isticmaalaayo ayuu dugsigu sii wadayaa inuu ardayda barayaa sida ammaan loogu isticmaalo internetka. Waxa ilo wax ku ool ah oo ay waalidiinta loogu talogalay ay yihiin Bogga internetka ee ThinkUKnow: www.thinkuknow.co.uk. Waxaad linki bogga ThinkUKnow ka heli doontaa bogga internetka ee dugsiga. Waxa dhammaan ardayda iyo waalidiinta laga filan doonaa inay akhriyaan oo ay saxeexaan xeerarka isticmaalka IT-ga ee dugsiga.

## DIREYSKA - GABDHAHA

Shuruudaha ayaa la soo yareeyey waxaana faahfaahinta lagu bixiyaa hoos. Direyska dugsigu waa inuu ahaado mid wanaagsan oo ku haboon in maalinta la xidhnaado. Moodada aadka u xad dhaafka ah ee qaabka timaha ama midabka, moodada goonada ama dhererkeeda ama dhererka surwaalka, ama kabaha, biimamka qurxinta, suumamka, cinjirka/xadhiga timaha ama qalabka kale ayaan ku haboonayn. Hilqadaha dhagaha la gashado waa inay ahaadaan qaar yaryar oo cadi ah ama kuwa lagu seexan karo oo keliya hal sad la xidhan karo wareega dhegta. Saacadaha qaaliga ah waa in aan la xidhin, iyadoo xidhashada dahabku kaliya lagu xadidey uun waxyaalaha astaan diimeed ah kuwaas oo direyska dugsiga hoostiisa ay tahay in lagu xidho.

Dhammaan gabdhaha ayaa laga filayaa inay soo xidhaan markay dugsiga ku soo socdaan iyo marka ka soo noqdaan iyo munaasibadaha dugsiga ee rasmiga ah

- Koodh buluuki madow xiga ah oo ay ku taalo calaamada dugsiga iyo taayga/niikteeynka dugsiga
- Goono buluuki madow xiga ah, laynka 'A' da ama la soo laabay, oo aan dhererka jilibka ka gaabneyn (fadlan hubi in la soo gato goono dhererkeedu ku habboon yahay si loogu oggolaado taas iyo koritaanka) ama surwaal buluuki madow xiga ah oo wada dheer (jean-ska, ka sameysan cord-ka ama wixii la mid ah ayaan la oggolayn)
- Shaadh dugsi oo cadaan saafi ah oo aan kugu dhaganeyn oo leh badhamaan sare si loogu xidho tayga
- Funaanad (waa inay ahaato mid qoorteedu qaabka v-da tahay oo midab buluuki madow xiga ah)
- Kabo madow oo la baalasheyn karo (kabaha tabobarashada/kabaha isboortiga/ kabaha xaga gadaal ka furan/kabaha cidhibta dheer leh/ayaan la ogoleyn)
- Taayt/sharabaadka dhajiska oo buluuki madow xigga oo saafi ah, madow ama cawlan buni xigga oo khafiif ah ama sharabaado buluuki ah oo saafi ah
- Dharka dibeddu waa inay ku dugsiga ku habboonaadaan, waana in dhammaan koodhadhku ay ahaadaan waar madow saafi ah ama buluuki madow xiga oo kaliya oo aan aan lahayn wax calaamado ah, liidad dhaldhalaalaaya, midab dhalaalaya ama suusad bir ah iyo badhamo (jaakada bilaa gacmaha, jaakadaha maqaarka, jaakadaha gaagaaban ee moodada ah, jaakada dheer ama jaakado midab dhalaalaya leh, jaakad leh dhogor nooc ay doonto ha ahaatee, koofiyadaha madaxa la gashadao oo leh dhogorta cad ama maro midab dhalaalaya leh, shaadhka koofiyada madaxa la gashado leh ayaan ku habboonayn).

## TIMAHA

Timahu waa inay lahaadaan hal midab oo dabiici ah uun. Waa in aanay jirin moodo xad dhaaf ah oo midabka timaha ama qaabka. Timaha in loo jaro heerka ugu hooseeya iyo in la qaabeeyo ayaan la ogoleyn. Timaha dheer waa in amaan ah oo ku habboon loogu xidhaa xiisadaha wax la qabanaayi iyo casharada sayniska ah.

## CIYAARAHA

- Shaadhka la kala gabin karo oo Amber/Dharka ciidanka Badda oo raqabad leh
- Sharabaadyada dibada loo xidho oo buluuki madow xigga ah
- Kabo hoosta aan isku sineyn/kabaha kubbadda cagta
- Surwaal gaaban oo buluuki madow xiga ah
- Surwaalka dheer ee lagu ordo oo madow buluuki xigga ah (ikhtiyaar ayaa loo yahay - loogu talogalay ciyaaraha dibadda bilaha jiilaalka uun)
- Funaanad buluuki madow xigta ah (ikhtiyaar ayaa loo yahay - loogu talogalay ciyaaraha dibadda bilaha jiilaalka uun)

## PE

- Shaati isboorti ah oo cad oo raqabad leh
- Surwaal gaaban oo buluuki madow xigga ah
- Sharabaado ilaa jilbaha jooga oo cad
- Kabaha isboortiga oo cad (aan aheyn kabaha jiimka - sarta hoose ee kabta waa in aanay madow noqon)

## DABAASHA

- Dharka dabaasha
- Koofiyadda dabaasha

Tuwaalada/shukumaanada

Meesha laga soo gato dharka dugsiga waa Kevins, 17 The Broadway, Greenford, Middlesex UB6 9PH.

**DHAMAAN ALAABTA WAA IN SI CAD LOOGU CALAAMADEEYAA**

**DIREYSKA - WIILASHA**

## DIREYSKA - WIILASHA

Shuruudaha ayaa la soo yareeyey waxaana faahfaahinta lagu bixiyaa hoos. Direyska dugsigu waa inuu ahaado mid wanaagsan oo ku haboon in maalinta la xidhnaado. Moodada aadka u xad dhaafka ah ee qaabka timaha ama midabka, qaabka ama dhererka surwaalka, ama kabaha, biimamka qurxinta, suumamka, ama qalabka kale ayaan ku haboonayn. Hilqadaha dhagaha la gashado waa inay ahaadaan qaar yaryar oo cadi ah ama kuwa lagu seexan karo oo keliya hal sad la xidhan karo wareega dhegta. Saacadaha qaaliga ah waa in aan la xidhin, iyadoo xidhashada dahabku kaliya lagu xadidey uun waxyaalaha astaan diimeed ah kuwaas oo direyska dugsiga hoostiisa ay tahay in lagu xidho.

Dhammaan wiilasha ayaa laga filayaa inay soo xidhaan markay dugsiga ku soo socdaan iyo marka ka soo noqdaan iyo munaasibadaha dugsiga ee rasmiga ah

- Koodh buluuki madow xiga ah oo ay ku taalo calaamada dugsiga iyo taayga/niikteeynka dugsiga
- Surwaalada cawlan dhexdhexaada ah (jean-ska, ka sameysan cord-ka ama wixii la mid ah ayaan la oggolayn) kuwaas oo ay tahay inay hoos ugu lushaan ilaa kabaha oo aan lana galin sharabaadada dhexdooda
- Shaadh cad oo saafi ah
- Funaanad (waa inay ahaato mid qoorteedu qaabka v-da tahay oo midab buluuki madow xiga ah)
- sharabaadada buluuki madow xiga ah
- Kabo madow oo la baalasheyn karo (kabaha tabobarashada/kabaha isboortiga ayaan la ogoleyn)
- Dharka banaanka waa inay ahaadaan qaar dugsiga ku habboon, waana inay jaakadahu madow saafi ah ahaadaan ama buluuki madow xiga oo aan lahayn wax calaamado ah, midab dhalaalaya ama suusad bir ah iyo badhamo (jaakad aan gacmo lahayn, jaakadaha maqaarka, jaakadaha gaagaaban ee moodo ah, jaakeed lagu ciyaaro dabayshana celinaya oo madax gashina leh oo midab dhalaalaya leh ama koodh, jaakad nooc kasta oo dhogor ah leh, koofiyadaha leh dhogor cad ama midab dhalaalaya, dhididka daboolan kuma habboona).

## TIMAHA

Timahu waa inay lahaadaan hal midab oo dabiici ah uun. Waa in aanay jirin moodo xad dhaaf ah oo midabka timaha ama qaabka. Timaha in loo jaro heerka ugu hooseeya iyo in la qaabeeyo ayaan la ogoleyn. Timaha dheer waa in amaan ah oo ku habboon loogu xidhaa xiisadaha wax la qabanaayi iyo casharada sayniska ah.

## CIYAARAHA

- Shaadhka la kala gabin karo oo Amber/Dharka ciidanka Badda oo raqabad leh
- Sharabaadyada dibada loo xidho oo buluuki madow xigga ah
- Kabo hoosta aan isku sineyn/kabaha kubbadda cagta
- Surwaal gaaban oo buluuki madow xiga ah
- Surwaalka dheer ee lagu ordo oo madow buluuki xigga ah (ikhtiyaar ayaa loo yahay - loogu talogalay ciyaaraha dibadda bilaha jiilaalka uun)
- Funaanad buluuki madow xigta ah (ikhtiyaar ayaa loo yahay - loogu talogalay ciyaaraha dibadda bilaha jiilaalka uun)

### PE

- Shaati isboorti ah oo cad oo raqabad leh
- Surwaal gaaban oo buluuki madow xiga ah
- Sharabaado ilaa jilbaha jooga oo cad
- Kabaha isboortiga oo cad (aan aheyn kabaha jiimka - sarta hoose ee kabta waa in aanay madow noqon)

### DABAASHA

- Surwaalka gaaban ee dabaasha (jilibka ka sareeya)
- Koofiyadda dabaasha

Tuwaalada/shukumaanada

Meesha laga soo gato dharka dugsiga waa Kevins, 17 The Broadway, Greenford, Middlesex UB6 9PH.

**DHAMAAN ALAABTA WAA IN SI CAD LOOGU CALAAMADEEYAA**

Is diyaarinta

## URURKA DUGSIGA

Si loogu hubiyo in shaqaale ku filan oo bixiya caawimo iyo hagitaan jiraan, ayaa arday kasta oo bilow ah lagu meelayn doonaa koox barayaal ah. Macallinka fasalka ka masuulka ah ayaa u shaqayn doonaa sidii macallin u gaar ah arday gaarka isagoo ka shaqeyn doona hagitaanka Madaxa Sannadka dugsiyeedka kaasoo ka mas'uul ah daryeelka, horumarka iyo anshaxa ee dhammaan ardayda ay ka mas'uulka yihiin.

## LAYLIGA IYO MAKTABADDA

Layligu waxa uu yahay qeyb muhiim ah oo ka mid ah waxbarashada ardayda. Waxa arday kasta guushiisa dugsiga iyo xirfadooda mustaqbalka mustaqbalka uu ku xidhan yihiin waxbarashada uu isagu qofku is diro. Waa inay waalidiintu xilliga fiidkiifursadda waxbarashada gaarka ah ee ku habboon u abuuraan. Maktabadu waxa ay furan tahay dugsiga ka hor, xilliga nususaacaha/biririfta, xilliga qadada iyo dugsiga ka dib si ay ardaydu waxbarashadooda gaarka ah ugu qabsadaan. Waxa layliga la isa siiyaa iyadoo la isticmaalaayo aaladaha internetka ee Show My Homework kaas oo ardayda iyo waalidiinta ka caawiya inay layligooda la socdaan. Waxa waalidiinta iyo ardayda la siin doonaa macluumaadka soo gelitaanka ee koontadooda gaarka ah inta lagu jiro todobaadka teeramka ugu horeeya.

Waxa dhammaan ardayda lagu dhiirigelinayaa inay isticmaalaan maktabadda dugsiga iyo maktabadaha dadweynaha. Baaxadda iyo cadadka wax akhriskooda shaqada uu dugsigu u dejiyey ka baxsan ayaa saamayn muhiim ah ku yeelan doontaa noloshooda mustaqbalka. Waxa ay maktabadda dugsigu furan tahay oo ay shaqaalaha maktabadu kormeeriaan/joogaan 8 subaxdii ilaa 5 galabtii, Isniinta ilaa Khamiista 8 subaxnimo ilaa 4.30 galabnimo maalinta jimcaha ah. Liisaska buugaagta loo soo jeedinaayo inay ardeyda Fasalka 7 akhriyaan ayaa la heli doonaa xagaaga ka hor.

Waxa uu sannad dugsiyeed kasta leeyahay jadwal layliga ah. Waxa layliga lala wadaagaa ardeyda iyo waalidka iyadoo la isticmaalaayo aaladaha internetka ee loo yaqaano Show My Homework. Waxyaalahan soo socda ayaa loogu talogalay inay ahaadaan wax kuu tilmaama wakhtiga ugu yar ee la iska filaayo in layliga la galiyo todobaad caadiga ah

(**Fasalka 7** - 6-7 saacadod) (**Fasalka 8** - 7–8 saacado) (**Fasalka 9** - 8–9 saacado) (**Fasalka 10** - 9–10 saacado) (**Fasalka 11** - 10–11 saacado)

## AQOON QABANQAABIYAHA ARDAYDA

Waxa dhammaan ardayda la siiyaa aqoon qabanqaabiyaha dugsiga kaas oo ay ku jiraan macluumaad kala duwan oo ay ka mid yihiin jedwal iyo bogag la socdo horumarka oo abaal-marinnada lagu diiwaangaliyo. Xusuus-qorku waa qaabka ugu muhiimsan ee ay ku wada xidhiidhayaan dugsiga iyo gurigu. Waalidka ayaa laga dalbanayaa inay si cad u sheegaan waxyaalaha ay u diyaariyeen qadada iyo safarka iyo balamaha caafimaadka. Waxa sidoo kale Jedwalka layliga la galin doonaa aqoon qabanqaabiyaha. Waxa ardeyda laga filayaa inay faahfaahinta layliga iyo sahqada loo soo dhiibey diiwaan geliyaan. Waxa waaalidiinta laga codsanayaa inay fiiriyaan oo ay aqoon qabanqaabiyaha saxeexaan ugu yaraan hal mar toddobaadkii iyo inay la xiriiraan Madaxa Sannadka dugsiyeedka haddii wakhtiga lagu isticmaalay layligu uu aad uga badan yahay ama uga yar yahay intii la rabay. Waa inay waalidiintu Show My Homework la isticmaalaan aqoonta qabanqaabiyaha si ay ula socdaan in layliga la dhammaystiray.

## WAX AKHRIYE LA DARDARGALIYEY

Dhammaan ardayda Fasalka 7 todobaad ku jirta ayaa ka qeyb noqon doona Barnaamijka Wax akhristaha La Dardargeliyay. Kani waa barnaamij wax akhris oo gaar ah kaas oo ujeedkiisu yahay in laga sii horumariyo wax akhris madaxabannaan iyo in la horumariyo awoodda wax akhriska ee ardayda. Ardayda, waalidiinta iyo Daryeelayaasha ayaa barnaamijka bisha Sibtembar lagu soo dari doonaa.

## MAQANAANSHAHA XILLIGA LA JIRAN YAHAY

Waa dhammaan nooc kasta oo maqnaansho jirrada ah dugsiga loogu soo sheegayaa telefoon ahaan maalin kasta oo la maqan yahay iyadoo qoraal la siiyo macalinka foomka marka ilmuhu uu dugsiga ku soo laabto. Khadka tooska ah ee daryeelka ardaydu Student Welfare waa 020 83575607 ama emayl u soo dir studentabsence@draytonmanorhighschool.co.uk. Markaad dugsiga bilowdo, ayaad awoodi doontaa inaad isticmaasho MyEd App si aad ugu soo sheegto maqnaanshaha. Waxaanu tilmaamo sida loo isticmaalaayo ah kugu siin doonaa bilowga xilliga dayrta.

## FASAXA MAQNAANSHAHA EE LOO DALBADAY SABAB KALE OO AAN CAADI AHEYN

Iyadoo la raacayo tilmaamaha laga helaayo Waaxda Waxbarashada, ayaa laga yaabaa inaanu Maamulaha bixin nooc kasta ha ahaadee wax fasax ah inta lagu jiro xilliga teeramka gudahiisa ilaa haddii ay jiraan xaalado gaar ah mooyaane.
Haddii fasax la maqnaanaayo la raadsanaayo, waa in warqad loo soo diraa ama loo keenaa Madaxa Sannad Dugsiyeedka ugu dambayn laba maalmood ka hor taariikhda fasaxa loo baahan yahay.

## ARDAYDA DUGSIGA DHEXDIISA KU DHEX JIRADA

Haddii uu ardaygu dugsiga ku dhex jirada ayay u baahan doonaan inay aadaan Qolka Caafimaadka. Mararka qaarkood, ayaa laga yaabaa in ardaygu baahdo in guriga loo diro iyadoo waalidiintu ay kaxeynayaan/qaadayaan. Fadlan hubi inuu markasta dugsigu haysto lambarada telefoonada lagaala soo xidhiidhaayo ee ugu dambeeyay ee xaaladan diyaar garowg ah.

## WACITAANKA TELEFOONKA

Waxa farimaha telefoonka kaliya la qaadi karaa oo ardeyda loo gudbin karaa uun marka ay jiraan xaalado degdeg ah kuwaas oo ku lug leh jirro halis ah oo soo gaadhay qoyska ka mid ah. Shaqaalaha xafiiska maamulka ayaanay caadi ahaan ayeyn inay shaqada ay qabanayaan ka tagaan si ay arday fariin ugu gudbiyaan.

## TELEFOONADA GACANTA

Waa inaan telefoonada gacanta dugsiga loo soo qaadan, wax kastaa ha dhacaane. Fadlan fiiri Xeerarka Telefoonka Gacanta kuwaas oo laga heli karo bogga internedka ee dugsiga.

## QADADA

Sida wakhtiga qadada loo habeeyey ayaa hoos ku qoran. Waxa waalidiinta laga codsanayaa inay ilmahooda mid ka mid ah kuwan u dooraan.

- Hoolka cuntada oo aad adigu isku adeeggayso kaas oo leh waxyaalo badan oo la kala dooranaayo oo cunto caafimaad leh ah oo qiimaheedana si cad loogu calaamadeeyay. Waxay ardaydu lacagta ka bixinayaan maqalka iyadoo loo eegayo qiimaha cuntada la doortay.
- Qado la soo duubtey ayaa dugsiga loo soo qaadan karaa oo laguna cuni karaa Hoolka Cuntada, Hoolka Dugsiga ama dibada/bannaanka.

Waxa adeegga cuntada lagu xushay si ku saleysan xeerka cunitaanka cunto caafimaad qabta iyo tayada cuntada. Jedwelka cuntada
ayaa la kala bedbedelayaa iyadoo marka nafaqadu loo eego ay tahay mid qiimo aad u fiican joogta. Waxa uu dugsigu ku shaqeeyaa nidaam aan lacag kaash ah la isticmaalin iyadoo la isticmaalo Biometrics halkaas oo ay waalidiintu u baahan doonaan inay ardayda lacagta ugu soo shubaan iyagoo la soo maraayo ParentPay.

Si waalidiinta iyo daryeelayaasha loogu fududeeyo inay dugsiga lacag siiyaan iyo si loogu yareeyo tirada lacagta kaashka ah iyo jeegaga ee dugsiga la siinaayo, waxaan kaa codsaneynaa inaad isticmaasho habkayaga lacag-bixinta ee elektarooniga ah aidoo isticmaalaya kaadhka bangiga (debit) ama ka densiga (credit card). Waxa kaas laga samayn karaa internetka iyadoo la isticmaalayo bogga internedka oo la yidhaahdo ParentPay.

Haddii aad haddaba leedahay koonto ParentPay ah oo dugsi kale oo isna isticmaala ParentPay ah, ayaad kaliya soo gali kartaa koontadaas oo aad ilmahaaga ku dari kartaa adigoo soo maraaya badhanka Add a Child ee boggaaga internetka.

Haddii aad ParentPay ayaad koontadaada ammaanka ah ka heli kartaa internetka adigoo isticmaalaya magaca isticmaale ee gaarka ah iyo erayga sirta ah ee uu dugsigu ku siin doono ka hor inta aan dugsiga la bilaabin.

## CUNTADA DUGSIGA EE BILAASHKA AH

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqda loo leeyahay cunto dugsiga ee bilaashka ah waxa laga heli karaa Waaxda Waxbarashada ee Ealing, Perceval House, 14-16 Uxbridge Road, Ealing W5 2HL ama internetka qeybta waxbarashada ee www.ealing.gov.uk. Dhammaan foomamka dalabka ee la soo buuxiyay waa in lagu soo celiyaa Perceval House si loogu hubiyo in cuntada la bilaabo bilowga xilliga deyrta.
Ardeyda cuntada bilaashka ah xaqa u leh ayaa cuntada toos ugu heli doona iyadoo la siin doono qadarka qiimaha maalin kasta u dhigma.

## ABAAL MARINAHA, ANSHAXA HEERKA SARE, DADAALKA NIYADA LA HAYO IYO ABAAL MARINTA WAXBARASHO IYO KHIBRADDA.

In ardaydayada lagu abaalmariyo habdhaqankooda wanaagsan ayaa ah qeyb ka mid ah dhaqanka dugsiga. Si aan ugu dhiirigelino inay had iyo jeer noqdaan kuwa ugu wanaagsan oo aanu ka taageerno sidii ay u gaari lahaayeen hadafkooda, ayaanu si joogto ah ugu qabanaa dabaaldegyo si loogu sharfo ardayda sida joogtada ah ugu muujiyey waxyaalaha uu dugsigu qiimeeyo ee Hamiga, Habdhqanka iyo Hanaanka Wanaagga ee Muwaadiniinta.

### *Anshaxa Heerka sare ah (Ethic of Excellence)*

Abaalmarinta Anshaxa Heerka sare ah waxay abaalmarisaa ardayda kuwa muujiyay heerka aadka u sarreeya ee maado, shaqo aad u wanaagsan oo hal mar la sameeyo si looga qeybqaato bulshada dugsiga oo ay soo magacaabeen macalimiintoodu.

### *Spirit of Endeavour (Dadaalka niyada la hayo)*

Abaalmarinta Spirit of Endeavour waxay aqoonsataa ardayda muujiyay shaqo anshax aad u wanaagsan leh oo si aad ah ugu shaqeeyay si ay ugu horumariyaan qeybaha muhiimka ah ee waxbarashadooda.

### *Abaal marinta waxbarasho iyo khibradda (Awards of Merit)*

Abaalmarinnada Awards of Merit waxa ay aqoonsataa ardayda la yimid dadaalka la taaban karo, heer gaadhay, ka qeybqaata waxqabadyada manhajka ka baxsan ee wax ku soo biiria horumarinta bulshada dugsigeena.

## XIRFADAHA

Waxa uu Lataliyaha Xirfaddu joogaa dugsiga dhexdiisa isagoo had iyo jeer diyaar u ah inuu siiyo iyo macluumaad siiyo waalid ama arday kasta. Waxa ay dhammaan ardaydu leeyihiin casharro muwaadinimada inta ay dugsiga dhiganayaan oo dhan. Waxay tani abuurtaa qeyb muhiim ah oo waxbarashadooda iyo hab-dhaqanka dugsiga ah.

## HANTIDA GAARKA LOO LEEYAHAY

Waxa uu arday kasta oo ku jira Fasalka 7 oo uu awoodi doonaa inuu sanduuq cid la wadaago. Waxa furaha la iska rabaa debaaji £5,00 ah. Waa inaan lacago badan iyo waxyaabo kale oo qiimo leh sida qalabka korontada ku shaqeeya, telefoonada gacanta iyo ciyaaraha elektaroonigga ah waa in aan dugsiga la keenin. Inta lagu jiro ciyaaraha iyo xiisadaha PE-ga waa in waxyaalaha qiimaha leh loo dhiibaa xubin ka mid ah shaqaalaha. Waxa aanu ka xunahay in sida dugsiyada kale iyo ururada kale ee sida isbitaallada la midka ah, aananu qaadi doonin mas'uuliyada ama xilka hantida shakhsi ahaaneed, taas oo ay ku jiraan dharka iyo dahabka dugsiga dhexdiisa lagu haysto.

## CIYAARAHA

Waxa dugsigu laga heli karaa waxyaalaha kubbadda cagta, rugby-ga, xeegada, kubbadda netka, cricket-ka, tennis-ka, ciyaaraha fudud, oroddo dheer oo lagu qabto dalka oo dhan, badminton, kubbadda koleyga, dabaasha iyo golf-ka, in kasta oo mid ama laba ka mid ah kuwan lagu koobay kooxaha da'aha gaarka ah. Barnaamij buuxa oo wata tartamo ayaa isboortiyadaas badankooda lala sameeyaa dugsiyada kale iyadoo ardeydana laga filanaayo in diyaar noqdaan haddii loo xusho inay kooxda dugsiga ka mid noqdaan.

## WAXQABADYADA MANHAJKA KA BAXSAN

Ilmahaaga ayaa mararka qaar ka qeybqaadan doonaa PE-ga oo ka dhici doonta garoonka dugsiga kaas oo qiyaastii dugsiga hal mayl u jira. Waxa ardayda laga rabaa inay garoonka ciyaaraha una sii lugeeyaan kana soo lugeeyaan haddii aan siyaabo kale wax loogu diyaarin si gaar ah, ama aan dugsiga lagula heshiin. In baaskiil loo sii kaxeysto garoonka ayaan la ogoleyn Daraasadaha kale ee maxali ah ee manhajka xidhiidhka la leh ayaa mararka qaarkood dhaca. Waa inay ardaydu ugu yaraan koox laba qof ka kooban isku raacaan. Waa inay had iyo jeer ardeydu jidka ka gooyaan meesha dadku ka talaabo iyadoo shaqaalaha PE-gu ayaa garoonka dibadiisa ka soo arki doona oo ay kulana kulmi doonaan garoonka. Kulliyadda PE-ga ayaa tilmaamo kale bixin doonta. Ardayda dhex mareysa inta u dhaxaysa goobta uu dugsigu ku yaalo iyo garoonka ayaan loo ogolayn inay la xidhiidhaan dad aan ahayn shaqaalaha dugsiga, ama ardayda kale ee iyaguna u sii socda ama ka soo socda garoonka. Waa inay sidoo kale ardaydu toos ugu tagaan ugan asoo laabtaan garoonka oo aanay tukaamada gelin.

## WAXQABADYADA DUGSIGA KA BAXSAN

Marka laga reebo isboortiga ayaa waxa jira waxqabadyo badan oo kale. Waxa kuwaas ka mid ah Kooxaha wada heesa, Orchestra, Xargaha Yaryar, Gargaarka Degdegga ah, Cunto karinta, Qorista Hal-abuurka leh, Booqashada Tiyaaterka, booqashooyinka abaabulan ee wadanka dibadiisa, Kooxaha Riwaayadaha iyo Aqoon is weydaarsiyada Kombiyuutarka.

## DADKA DUGSIGA KA QALANJABIYEY

Ururka ardaydii hore ee dugsiga (Draytonians) ayaa door gaar ah oo firfircoon ka ciyaara isboortiga maxaliga ah iyadoo dhamaan ardeyda lagu soo martiqaadayo inay ku soo biiraan markay dugsiga dhameystaan.

## WARBIXINADA

Waxa ay dhammaan ardayda dhigata Key Stage 3 sanad dugsiyeed kasta heli doonaan saddex Warbixinood. Simister kasta, waxay ardaydu heli doonaan macluumaadka ku saabsan horumarka ay ka samaynayaan qiimeynaha muhiimka ah ee maaddooyinka ay bartaan. Waxa sidoo kale warbixinta ku jiri doona heer lagu sheegaayo hab-dhaqanka waxbarashada ee ardeyda ee dhamaan mid kasta oo ka mid ah maadooyinkan la bartay.

## BALAMAHA

Waxa uu dugsigu soo dhawaynayaa wada shaqaynta suurtogalka ee dhexmari karta macalimiinta iyo waalidiinta. Waxay ay had iyo jeer caawisaa in waalidka waxkasta oo ilmahood ama carruurta khuseeya la maqlo. Waa inay waalidiintu caadi ahaan la xidhiidhaan macallimiinta maadooyinka dhiga ama macalimiinta fasalka ka masuulka ah marka hore la xidhiidhaan. Waxa ay waalidiintu shaqaalaha la xidhiidhaan iyagoo isticmaalaya isku dubbarideha aqoonta ardayda, warqado, lambarka telefoonka ee 0208 357 5607 ama emaylka adminoffice@draytonmanorhighschool.co.uk si ay u ugu diraan xubinta shaqaalaha: Magaca/Koodhka Arrimaha aan la xallin ama arimaha shakhsi ahaaneed waa in loo gudbiyaa Madaxa Kulliyadda/Sannad dugsiyeedka. Shaqaalaha Sare ayaa si dhow ugala xiriiri doonaan waalidiinta iyo madaxa kulliyadda/Sanadka dugsiyeedka.

## WADA XIDHIIDHKA

Waxa wargeyska dugsiga waalidka iyo daryeelayaasha loo diraa teeramka kasta kala badhkiis. Waxa ay warqaddu faahfaahisaa waxyaalaha cusub ee wararka iyo dhacdooyinka ee teeramka iyo sidoo kale macluumaadka muhiimka ah ee teermka soo socda. Waxa uu dugsigu sidoo kale soo diraa wargeys toddobaadle ah kaas oo sheegaaya dhacdooyinka ay waalidiintu ka qeybgeli karaan isagoo la socodsiiya waxqabadyada dugsiga. Ciwaanka bogga internetka ee dugsigu waa www.draytonmanorhighschool.co.uk. Waxa si joogto ah loogu cusboonaysiiyaa macluumaadka muhiimka ah. Waa muhiim inuu dugsigu haysto ciwaanka emaylka iyo lambarka telefoonka gacanta ee lagaala soo xidhiidhaayo.

## SARAAKIIDHA DUGSIGA OO AMAAN AH

Saraakiidha Dugsiga ee Amaanku waa PC Mughal, doorkiisu waxa weeye in taageero la siiyo ardeyda, shaqaalaha iyo waalidka. Waxa uu PC Mughal si dhow ula shaqeeyaa dugsiga si loogu hubiyo in ardaydayadu qaar amaan ah ku yihiin agagaarka deegaanka iyo dhacdooyinka goobta ka baxsan.

Muusiga

Waxa uu Drayton Manor bixiyaa fursado dhowr fursadood oo waxbarashada muusiga ah:

Dhammaan ardayda fasalka 7, 8 iyo 9 waxay raacaan koorso habaysan oo horumarinaysa xirfadaha kali ahaaneed iyo kuwa kooxaha muusiga. Waxay ardaydu bartaan inay tumaan qalabka fasalka sida kiiboodhka korontada ku shaqeeya iyo ukuleles. Waxaanu barnaa xirfadaha halabuurka, kuwaas oo shakhsi ahaan ama koox ahaan ah, iyo sidoo kale xirfadaha maqalka ee aragtida muusiga iyo aqoonta muusiga. Tiknoolajiyada muusiga ayaa ku dhex jirta manhajka oo dhan iyadoo aanay waaxdu haysato kombiyuutarada iMacs iyo MacBook Pro oo loogu talagalay ardeyda wax curinaysa ee wax duubaysa.

Fasalka 10, 11, 12 iyo 13 ayay ardaydu, haddii ay rabaan, ay muusiga u qaadan karaan heer GCSE ama A.

## XIISAYAASHA GAARKA AH:

Ardayda xiisaha gaarka ah u haya muusiga ayuu dugsigu bixiyaa casharada lacagta la iska qaado ee waxyaabaha soo socda:

- Xargaha - Violin, Viola, Cello, Bass Double, Gitaarka
- Brass - Trumpet, French Horn, Euphonium, Trombone, Tuba
- Woodwind - Flute, Clarinet, Saxophone, bassoon, oboe
- Keys - biyaano
- Heesida
- Durbaanka

## QIIMAHA CASHARKA QALABKA MUUSIGA IYO DHEERARKA CASHARKA

Dhererka casharka qalabka muusigu waxa uu noqon doonaa soddon daqiiqo. Casharrada kooxaha ayaa laga yaabaa inay noqdaan ugu badnaan afar arday laakiin laguma heli karo biyaanada ama durbaannada.

Casharo gaar qofka loo siinaayo £100 teermkiiba
Casharrada la isku daray £55 teermkiiba
Casharrada koox ahaaneed £40 teermkiiba
Aaladaha la deynsadao £30 oo deebaaji ah, dib la iskugu soo celinaayo marka la soo celiyo qalabka muusiga iyadoo sugan oo dayactir wanaagsan leh, iyadoo ku xidhan haddii la heli karo
Lacag dhimis loo sameynaayo ardayda hesha cuntada dugsiga ee bilaashka ah ama kuwa mar uun helay cunto dugsiyeed ee bilaash ah lixdii sano ee la soo dhaafay
Casharo gaar qofka loo siinaayo £25 teermkiiba
Casharro la isku daray/koox ahaaneed £20 teermkiiba
Casharrada kooxda £15 teermkiiba
Aaladaha la deynsadao £20 oo deebaaji ah, dib la iskugu soo celinaayo marka la soo celiyo iyadoo sugan oo dayactir wanaagsan leh, iyadoo ku xidhan haddii la heli karo

Fadlan wax lacag ah ha soo dirin ilaa ay Waaxda Muusigu kula soo xidhiidho.

## KOOX LA TUMITAAN

Waxa dugsiga Sare ee Drayton Manor ka jira koox muusiga oo tiro badan. Ardeyda casharrada qaadaneysa ayaa lagu dhiirigelinayaa inay  kuwaas ka qeybqaataan, laakiin xubinnimadu ayaan ku koobnayn uun kuwa casharrada dugsiga ka qaata oo keliya. Qof kasta oo u tumi kara ilaa heerka la iska rabo ayaa aad loogu dhiirigelinayaa inuu ka qeybqaato, iyadoo kooxahan ay si joogto ah uga qeybqaataan nolosha dugsiga ee marka safka lagu jiro iyo dhacdooyinka kale ee dugsiga. Waxa kooxaha muusiga ee dugsiga laga helaayo ka mid ah:

Kooxaha muusiga ee dadka u furan
• Flute Band
• Sax Band
• Greenhorns
• Clarinet Choir
• Junior Strings
• Senior Strings
• Pop Choir
• Orchestra
• Wind Band
• Kooxda heesaha ee fasalka 7 iyo 8
• Fusions

Auditioned Ensembles
• Chamber Choir
• Sixth Form Band
• Funk Band
• Goldenhorns
• Upper Strings
• Guitar Band
• Rock Band
• Jazz Group
• Auris

BANDHIGYADA

Waxaa jira fursado bandhigyo kala duwan lagu sameynaayo sannad dugsiyeedka. Waxa Bandhiga Christmas-ka ee sanadlaha ah la qabtaa
dhamaadka Simisterka Dayrta kaas oo ay ku jiraan bandhigyo ay sameeyaan arday ka socota dhammaan kooxaha sanadka oo noocyo
kala duwan ah. Waxa sidoo kale jira bandhig sannadle ah oo dugsigu sameeyo kaas oo inta badan dhaca xilliga Gu'ga. Waxa bandhigyada
dhamaan jiray ka mid ahaa The School of Rock, The Witches iyo Peter Pan. Fursadaha kale ee bandhigyada
waxa ka mid ah House Music Festival, oo ah bandhiga Fasalka 7, Lunchtime Music events iyo the Arts Faculty Summer Bandhig.

FARSHAXAN IYO NASHQADEYN

Marka uu wiilkaagu/gabadhaadu ay dugsiga ku soo biirto, ayaa la siin doonaa jedwel uu ku jiro hal saacadood oo Farshaxan iyo Naqshad ah todobaadkiiba.

Mid ka mid ah shuruudaha Farshaxanka iyo Naqshadeynta ayaa ah in ardeysgu ku shaqeeyo buug wax gacanta lagu sawiro oo nooca A4 ka ah, kaas oo ay ku jiraan warqad koobiga sameysaa. Waxa laga dalban doonaa inay kaas cashar kasta oo Farshaxan ah u soo qaataan. Waxa ay taasi micnaheedu yahay inay u baahan doonaan todobaadka ugu horreeya ee dugsiga ay bilaabaan iyo casharkooda ugu horreeya ee farshaxanka.

Waxa aan kugula talineynaa inaad soo iibsato buug sawir wax gacanta lagu sawiro oo ay ku jiraan warqad koobiga sameysaa waana inuu tolnaadaa, halkii uu iskugu xidhnaan lahaa ama isku xabageysnaan lahaa. Waxa aanu awoodnaa inaanu wiilkaaga/gabadhaada siino buug sawir wax gacanta lagu sawiro oo leh warqada koobiga, oo uu ku xardhan yahay magaca dugsigu, tolan oo qaabka sawirka ah, kaas oo qiimahiisu yahay £1 iyo xidhmo qalin rasaas ah oo qiimahiisu yahay £1.

Haddii aad rabto inaad iibsato buugaa gacanta wax lagu sawiro iyo/ama qalinka rasaasta, fadlan sax sanduuqa xagga hore kaga yaala xirmada macluumaadka dugsiga. Markaas ayaa wiilkaaga ama gabadhaadu ay heli doontaa buug gacanta wax lagu sawiro/qalin rasaasta markay ku jiraan casharkooda Farshaxanka.

Haddii kharashku uu dhibaato leeyahay fadlan u soo dir wiilkaaga/gabadhaada inay la kulmaan Mr Sutherland, Madaxa Farshaxanka, Waaxda Farshaxanka, xilliga lagu jiro todobaadka ugu horreeya ee dugsiga ee bisha Sibtembar.

## IIBSIGA BUUG GACANTA WAX LAGU SAWIRO IYO QALINKA RASAASTA EE FARSHAXANKA IYO NASHQADAYNTA

Buuga sawir wax gacanta lagu sawiro £1
Qalinka rasaasta £1

Waxa lacag klagu bixin karaa lacag kaash ah ama jeeg ku jira baqshadda la isa siiyay.

OGGOLAANSHAHA BIOMETRI-GA

Waxa uu dugsigu ku shaqeeyaa nidaam aan kaash la isticmaaleynin kaas oo loo qoondeeyey in lagu hagaajiyo nidaamka ardayda ay ugu iibsato cuntooyinka iyo cuntooyinka fudud ee Hoolka Cuntada waxaanu kuu ogolaadaa, adiga waalid ahaan, inaad aragto waxa uu ilmahaagu cunaayo.

Waxa ay waalidiintu u baahan doonaan inay isticmaalaan ParentPay si ay ugu maalgeliyaan oo ay koontada wiilkooda/gabadhooda lacag ugu shubaan. Waxaad heli doontaa warqad kuu sheegeysa sida loo soo galo koontadaada ParentPay ka hor inta aan ilmahaaga dugsiga soo galin. Haddii wiilkaaga/gabadhaadu ay xaq u leedahay cuntada bilaashka, ayaanad u baahneyn inaad maalgeliso oo aad lacag ugu shubto koontada ParentPay.

Si loogu helo nidaamka cunto qadista oo kaash la;aan ah ayaa ardayda farahooda la (akhrinta biometric) qiyaasi doonaa. Marka uu ardaygu cuntadiisa doorto aay aadi doonaan maqalka oo ay saari doonaan farta murdisada aalada akhrida biometric-ga, taasi ayaa kadibna shaashad ka muujin doonta koontadooda waxayna ka goosan doontaa qaddarka ku habboon. Waxa aad waalid ahaan awoodaa inaad eegto waxa uu yahay jedwelka cuntada ee ilmahaagu adigoo soo maraaya ParentPay.

Sida waafaqsan Ogeysiita waxyaalaha Qarsoodiga ayaanu kaa rabnaa ogolaanshaha ugu yaraan hal waalid si xogta biometric-ga ee ilmahaaga loo maareeyo. Fadlan waxaad ku kalsoonaataa in macluumaadkani uu dugsiga dhexdiisa ooli doono iyo in macluumaadka biometric-ga ee la qaaday uu yahay algorithm ee aanu ahayn farahiisa oo dhab ah.

Haddi aad doorbido inaan macluumaadka faraha ilmahaaga la qaadin, ayuu dugsigu bixin doonaa hab kale oo kaas bedelkiis ah oo aqoonsi ah oo leh 4-lambar oo koodh PIN ah. Waxa uu dugsigu doorbidayaa in la isticmaalo biometrics maadaama oo uu kani yahay hab sugan oo ka dhakhso badan waxaanan aad uga mahad celinaynaa intaad arrintan nagala shaqeynayso .

Fadlan buuxi oo saxeex Biometric Consent Form ee ku dhex jira Xidhmada Oggolaanshahaaga.

XEERARKA AMMAANKA INTERNETKA IYO HESHIISKA ISTICMAALAHA EE LA AQBALI KARO

**Waxa aan ogolaanayaa inaan**

- Kaliya aan isticmaalo doono aaladaha ICT-ga dugsiga, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn intarneedka, Microsoft Office, fiidyaha dijitaalka, laptop-yada iyo kombiyuuterada caadiga ujeeddooyin dugsi.
- Aan cidna la wadaagin macluumaadka shakhsi ahaaneed ee sida magaca oo dhan, lambarka telefoonka ama cinwaanka haddii qof ka tirsan shaqaalahu ku hagaayo mooyee
- Ha la soo degin ama ha ku rakibin qalabka tignoolajiyada ee dugsiga
- Ha u isticmaalin agabka dugsiga si aad u ciyaaro ugu ciyaarto (ama ha ahaadaan internetka ama qaar lala soo degay) marka laga reebo kuwa uu macallinku farayo
- Hubi in aqabka xogta lagu keydiyo ee lagu isticmaalo dugsiga, oo ay ku jiraan USB-yada, ay kaliya ku jiraan uun faylal ku habboon isticmaalka dugsiga
- Kaliya ku soo galaaya shabakada dugsiga iyo aaladaha kale anigoo isticmaalaaya magaca isticmaalaha iyo xarafka sirta ah
- Hubi marka ay tahay inaan 'codka iska xidho' anigu (tusaale ahaan Microsoft Teams)
    - inaanay jirin buuq gadaal laga maqlaayo oo aan habboonayn
    - Waxaan kaliya tan samayn doonaa marka la iga dalbado uun
    - Waxaan uga qeybqaadan doonaa si wanaagsan oo ku habboon marka la iga dalbado
- Aanan cidna u sheegin ereyga sirta ah oo aan si joogto ah u beddeli doono
- Ha fiirfiirin, la soo degin, adigu ha galin, oo cidna ha wadaagin walxo loo arki karo xadgudub ama sharci darro. Haddii aan si lama filaan ah waxyaalahan ula kulmo waxaan si degdeg ah ugu wargalin doonaa macalinkayga
- Ogolaansho ka raadso macalinkayga iyo/ama waalid si aad qof ula kulanto sida qeybta ka ah mashruuca uu dugsigu sameynaayo
- Hubinaaya in hawlahayga online-ka ah ee dugsiga gudahiisa iyo dibaddiisuba aanay dadka kale u keenin wax dhibaato ah
- Wax kasta oo ku saabsan hatidaada internetka laga sameeyo isla markaaba u soo sheeg shaqaalaha
- Ixtiraam waxyaalaha dadka kale u gaarka ee internetka
- Aanad isku dayin inaad amniga ICT ee dugsiga ka soo gudubto
- Hubi in dhammaan wadahadalada dadka kale uu noqdi mid mas'uul ah, ku habboon oo macquul ah, iyadoo aad markasta si edeb led u dhaqanto, ku qor jumlad buuxa iyadoo la isticmaalayo salaan iyo is maca salaameyn.
- Wixii dhaawac ah ee soo gaadha aaladaha farsamada, ama si qaladka u isticmaalka ee nidaamyada ICT-ga isla markaaba xubin ka mid ah shaqaalaha xitaa haddii aanan mas'uul ka ahayn
- Had iyo jeer inaan ka baxo markaan shaqada dhameeyo

**Anigu uma**

- Aanan si shakhsi ahaaneed u isticmaali doonin nidaamka isgaarsiinta ee dugsiga
- U sii gudbin doonin emaylada iyadoo aan la haysan ogolaansho qofka soo qoray iimaylka
- Aan booqan boggagga internetka ee aan habooneyn ama mamnuuca ah, sida boggaga ay ju yaalaan sawirada qaaqaawan, dumarka yasa, cunsuriyada, xag-jirka ama ka dhanka khaniisiinta.
- Galitaanka baraha bulshada ama qolalka chat-ka lagu sameeyo inta lagu jirto khadka dugsiga
- Duubista, daabacida ama qeybinta sawirada ama fiidyowyada xubnaha kale ee bulshada DMHS iyadoo aan ogolaansho rasmi ah la haysan
- 'Codka iska xidho' anigu (tusaale ahaan Microsoft Teams) marka/haddii

o aan la iguma soo casuumin
o Waxa jira sawaxan aan loo baahneyn oo xagga danbe ka baxaaya
o Aanan casharka ku soo kordhin doonin wax wanaagsan ama ku habboon

- U isticmaal tignoolajiyada dhijitaalka ah si sucad xumo u soo jiida DMHS
- La soo dega ama baahin wax kasta oo aan si toos ah xidhiidh ula laheyn waxbarashadayda

- Isticmaal khadka ICT-ga ee dugsiga, kaas oo ay ku jirto internetku, emaylku, MS Teams, fiidyayaasha dijitalka ah, tignoolajiyada moobaaylka si cid loogu xoogsheegto, looga xanaajiso ama loogu caayo.
- U isticmaal nidaamka isgaarsiinta ee gaarka ah tusaale ahaan koontada Hotmail ee isticmaalka dugsiga ee sharaxaad kasta
- La qeybiya, la soo qaata ama la keydiya sawirro, qoraal ama agab laga yaabo in loo arki karo inay yihiin wax aan wanaagsanayn, sawirada galmada/qaaqaawan, takoorid, dumarka yasa, cunsuriyada, ka dhan ah khaniisiinta, xagjirka, waxyaalaha ceebta/galmada la xiriira ama sharci-darrada ah.
- Helitaanka macluumaadka la xuquuqda daabacaada iyadoo la isticmaalaayo hab ku xad-gudbaaya xuquuqda daabacaada
- Baahiya aragtiyada shakhsi ahaaneed oo aan la codsan oo ku saabsan arrimaha bulshada, siyaasadda, diinta ama waxyaalaha kale ee aan dugsiga xidhiidh la laheyn
- Gudbiya waxyaalo aan la codsan oo ganacsi ahaaneed ama xayaysiis aan (SPAM)
- Samee hawlo ula kac ah oo lumiya dadaalka shaqaalaha ama awooda khadka
- Shabkadaha soo galiya nooc kasta oo ka mid ah fayruska kombuyuutar ama malware
- Gala qof kale koontadiisa Microsoft Office ama goob kasta oo kale oo lagu ilaaliyo erey sir ah sida Show My Homework, Unifrog
- La wadaaga ereyga sirta ah cid kale

- Shaqada layliga, shaqada koorsada, shaqada fasalka cid kale tooda soo qaata, markasta ha ahaatee ama shaqadeyda la wadaaga ardayda kale taas oo ay ujeedkeedu yahay in cid kale laga qaato

**Waxaan fahansanahay in**

- Dhammaan isticmaalkayga internetka iyo tignoolajiyada kale ee la xidhiidha ayaa lala socon doonaa iyadoo lagu keydin doonaa goobta iyo meel ka baxsan goobta
- Waxa xeerarkan loo soo dejiyay si abiga ammaankega loogu ilaaliyo iyo in haddii aan la raacin, ciqaabta dugsiga la isa saari doono
- Waxa ay DMHS eegi doontaa faylalka kombiyuutarkayga waxayna la socon doontaa boggaga interneedka ee aan booqdo iyo/ama fariimaha aan diro/ka helo ee goobta dhexdeeda iyo dibadeeda labadaba.
- Casharrada lagu qaato Microsoft Teams/Zoom ayaa la duubi doonaa
- Haddii aan ku guuldareysto inaan raaco xeerarkaas kor lagu soo sheegay, ayaa gelitaankaga internetka iyo/ama shabakada kombiyuutarka ayay saameyn doontaa waxaana la u saari doonaa xanibaad sida ku qeexan Siyaasadda Hab dhaqanka ee dugsiga.

LIISADA QALABKA, SANDUUQYADA IYO BUUGAAGTA

## AGABKA CASHARADA LOO ISTICMAALO

Ardaydu waa inay haystaan, aqab shakhsi ahaaneed, qalabka ku qoran liistada halkan ku lifaaqan. Waxa casharada loo baahan dooonaa kaalkuleytar dhammaan marxaladaha shaqada ee ardayga. Waxay ardeydu u baahan yihiin inay mid guriga ku haystaan si ay u isticmaali karaan Layliga guriga, haddii ay suurtogal tahay, inay mid soo qaataan iyadoo ay taasi tahay iyaga khatartooda waana in si aan laga tirtiri karin loo calaamadeeyaa. Dugsigu ayaan qaadi karin inuu bixiyo kaalkuleytaro loo isticmaalo casharrada ama imtixaannada.

- Shandada dugsiga oo A4-ah garabkana la sudhan karo
- Buug wax akhris
- Shandada qalimaanta
- Masaxaad
- Aalada lagu qoro qalimaanta
- Qalin/qalimaan khad ah
- Qalin biiroo cagaar ah
- Qalinka ledhka HB oo loo isticmaalo Farshaxanka iyo Naqshadda
- Xidhmo lix qalin oo midab leh (nooca felt-tips ka looma baahna)
- Qalin rasaad 2b ah
- Buug gacanta  A4 ah oo wax lagu sawiro oo warqadda nuqulka sameysa leh
- Xabag nooca Prit Stick
- Xidhmo qalabka wax lagu sawir (masdarad 30cm ah, qalabka xagasha lagu cabiro iyo labo jiheeye) oo ku jira shandad yar
- Kaalkuleytar nooca sayniska ah. Waxaanu idinkula talin laheyn Casio FX-83 (qiyaastii £6.00)

Masaxaada dareeraha ee dhalada ku jira ayaan la ogoleyn

- Dhalada biyaha oo dib loo isticmaali karo

Waxa dhammaan alaabta lagu calaamadeyn doonaa magaca ardayga

## SANDUUQYADA

Waxa uu arday kasta oo ku jira Fasalka 7 oo uu awoodi doonaa inuu sanduuq cid la wadaago. Waxa furaha la iska rabaa debaaji £5 ah. Waxa sanduuqa ardayda la siin doonaa inta lagu jiro todobaadka ugu horeeya ee teermkiiba. Waa inaan se lacago badan iyo waxyaabo kale oo qiimo leh sida stereo-ga gaarka loo leeyahay, pager-ka, telefoonada gacanta iyo ciyaaraha elektaroonigga ah waa in aan dugsiga la keenin. Inta lagu jiro ciyaaraha iyo xiisadaha PE-ga waa in waxyaalaha qiimaha leh loo dhiibaa xubin ka mid ah shaqaalaha. Waxa aanu ka xunahay in sida dugsiyada kale iyo ururada kale sida isbitaallada la midka ah, aananu qaadi doonin mas'uuliyada ama xilka hantida shakhsi ahaaneed, taas oo ay ku jiraan dharka iyo dahabka dugsiga dhexdiisa lagu haysto.

## BUUGGTA

Waxa buugta wax laga barto soo saara waaxyaha kala duwan kolba sida loogu baahdo. Waxa muhiim ah in isla markaasba buugta oo dhan la soo celiyo dhammaadka koorso kasta. Waxa buugta lumtay ama goo'gosan la iska qaadi doonaa kharashka lagu bedelaayo oo dhan. Waxa taasi sidoo kale ku jira buugta maktabadda dugsiga.

**Macluumaad Dheeraad ah**

**URURKA MACALLINTA IYO WAALIDKA**

Ku soo shawow Ururka Macallinta Iyo Waalidka ee Dugsiga Sare ee Drayton Manor. Ma jirto wax lacag rukunsi ah oo la bixinayaa waxaanad xubin ka noqon doonto ilaa inta u ilmahaagu dugsiga dhigto.

Marka uu ilmahaagu dugsiga sare u gudbo dugsiga ayay waalidiin badani tabaan heerka ka qeybqaadashada ee bulshada dugsiga iyo xiriirka dhow ee ay waalidiinta kale la sameysteen muddo dhowr sano oo dugsiga hoose ah lagu jiray. In laga qeybqaato PTA-ga ayaa waxay kuu siin doontaa inaad dhisto xiriir la mid ah oo aad la sameysato waalidiinta kale ee carruurtoodu dhigtaan Dugsiga Sare ee Drayton Manor.

Waxqabadkayaga ugu muhiimsan waa shirar teermkiiba si looga wada hadlo dhinacyada waxbarashada ubadkeena, lacag ururinta badiyaa la isticmaalaayo alaabta xaraashka ee baabuurta lagu dul gado - iyo dhacdoda bulsho ahaaneed ee mararka qaar la sameeyo!

Maxaad ka helaysaa inaad si ka badan PTA uga qeybqaadato
- In la dareemo in laga mid noqdo bulshada dugsiga
- Si aad wax ka yara badan uga ogaato waxa dugsiga ka socda
- Aa kala barato qaar ka mid ah shaqaalaha waxbarida
- Aad si toos ah uga qeybqaadato waxbarashada ilmahaaga
- Wax ku soo celi bulshada dugsiga
- Ka qeybqaado doodaha ku saabsan sida lacagta la soo ururiyo loo isticmaalaayo
- Fikrado cusub miiska soo dhig
- Ku baadhaal!

## XEERARKA DUGSIGA

Haddii aad xiisaynayso inaad munaasibada PTA da timaadid ama inaad ka caawiso iibinta alaabta duuga (saacad iyo nus uun si aad lacagta albaabka laga soo galaayo uga ururiso), fadlan emayl ciwaanka hoose u soo dir.Macluumaadka ku saabsan kulamada PTA iyo munaasibadaha ayaa laga heli karaa bogga internetka ee dugsiga ee www.draytonmanorhighschool.co.uk.

Xeerarkan iyo tilmaamahan soo socda ayaa bogga internetka ee dugsiga laga heli karaa. Fadlan la xidhiidh xafiiska qaabilaada ee dugsiga haddii aad nuqul u baahan tahay.

- Xeeraka oggolaanshaha
- Xeerarka imaanshaha iyo wakhti ku imaanshaha
- Xeeraka habdhaqanka
- Xeeraka Ka-hortagga Xoogsheegashada
- Xeerarka Waxbarashada Xirfadaha, Macluumaadka, Talobixinta iyo Siyaasadda Hagitaanka
- Xeerka Kharash ka qaadista ee Wakhqabadyada Dugsiga
- Ilaalada Carruurta iyo Xeerarka Badbaadinta Carruurta
- Carruurta leh baahiyaha caafimaadka ee Aan ka Qeybgeli karin Siyaasadda Dugsiga
- Xeerka Guud ee Nidaaka Cibaadaysiga
- Cabashooyinka ka Dhanka ah Nidaamka Dugsiga
- Xeerka Hagitaanka Manhajka
- Xeerka Baaskiilada Dugsiga loo soo qaadanaayo
- Xeerarka Booqashooyinka Waxbarashada
- Xeerka Sinnaanta iyo Kala duwanaanta iyo Hagitaanka
- Xeerka Caafimaadka iyo Ammaanka
- Caafimaadka, Galmada iyo Xeerka Waxbarashada Xiriirka
- Heshiiska Dugsiga Guriga
- Xeerka ka mid noqoshada
- Xeerka Kiraynta Kireysiga
- Xeerka siyaasada Carruurta La hayo/ilaaliyo oo loa daryeelay
- Maareynta Xasaasiyadda La yeesho/Xeerla Shooga xasaasiyada ee dadka naqaku ku dhago
- Xeerka Telefoonka Gacanta
- Xeerka Hawlaha Goobta dugsiga ka baxsan
- Xeerka Ammaanka Internetka
- Faragelinta Jir ahaaneed si loogu Xakameeyo ama Tilmaaaha Xakameynta Ardayda

- Xeerka Walxaha Mamnuuca ah oo ay ku jiraan Maandooriayaashu
- Ogeysiinta Waxyaalaha shakhsiga u gaarka ah
- Nidaamka Dacwadaha Ka dhanka ah Xeerarka Dugsiga
- Xeerka Helitaanka Bixiyaha
- Xeerka Anshaxa Waxqabadka ee Shaqaalaha
- Xeerka ku Taageerida Ardayda Baahida Caafimaadka
- Xeeraka khudbad soo jeediyaha
- Xeerka Lacagta Deeqda Ardayga
- Xeerka Isticmaalka Wakaaladaha dugsiga ka Baxsan
- Xeeraka soo booqdayaasha
- Xeeraka hubka

Shuruudaha Isticmaalka Wireless-ka iyo Heshiiska Liisanka Isticmaalaha/Xeerka Afeef dhigashada

## DEEQAHA DUGSIGA EE TABARUCAADKA

### WAXQAABKA DUGSIGA EE TABARUCAADKA

Waxa jira sanduuq u gaar ah dugsiga oo loogu talogalay in lagu daboolo kharaadka waxqabadyada dugsiga, kuwaas oo aan laga maalgelin karin hantida dadweynaha. Sanado badan, ayaa hase yeeshee, uu sanduuqani awoodi kari waayay inuu daboolo dhammaan kharashyada waxqabdyada ee ardeyda la siinayo.

Sidaa darteed, waxa la rajeynayaa inay dhammaan waalidiintu tabarucaad sameeyaan. Waxay tani dugsiga awood u siin doontaa waxyaabaha ay ka midka yihiin, si ay ugu daboolaan qaar badan oo ka mid ah kharashaadka safarka iyo kharashka cabitaanada ee ciyaaraha dugsiga iyo si loogu taageero waxqabadyada kale ee manhajka ka baxsan iyo ururada. Waxqaabka Dugsiga ee Tabarucaadka waxa uu noqon doonaa £10 sanadkiiba iyo qoyskiiba, taas oo la bixin doono maalinta koowaad ama labaad ee Simisterka Dayrta oo uu sida caadiga ah bixin doono ilmaha ugu yar.

### WAXQAABKA DUGSIGA EE TABARUCAADKA

- Tani waa wax tabarucaad ah oo gacan ka geysan doona hawlaha taageerada ardayda isagoo korna u qaadaaa xarumaha iyo agabka dugsiga

- qoyskiiba £10 sannadkii oo bisha Sibtembar la bixinayo, sida caadiga ah waxa bixiya ilmaha ugu yar

## CABASHADA EE DHERAADKA AH

### CABASHADA EE DHERAADKA AH

Walwalka waalidka ee ku saabsan dugsiga ama manhajka ayaa laga jawaabi doonaa loona xallin doonaa si xasaasi ah. Walwalka hore ama su'aalaha ayaa looga maareyn doonaa heer aan rasmi ahayn mar kasta oo ay taasi suurtagal tahay. Kiisaska badankooda ayuu arinka xalin karaa xubin gaar ah oo shaqaale ah.

Nidaamka Cabashooyinka Dugsiga ka Dhanka ah ayaa laga heli karaa bogga internetka ee dugsiga.